

*Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya
Dowlad Goboleedka Galmudug
Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha*



Galmudug State
Ministry of Finance & Economic Development

جمهوريّة الصومالية الفدراليّة
حكومة إقليم جلمندج
وزارة المالية وتنمية الاقتصاد

Taariikh: 27/12/2018

Tilmaanta/Amarka A –

Awood cid u wakiilashada

1. Awoodda, Hadafka & Baaxadda

1.1 Tilmaantan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qaybta 20aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha, 2018.

1.2 Hadafka laga leeyahay tilmaantan waa in la rasmiyeeyo siyaasadda iyo geeddi-socodka awoodaha mid ka mid ah ama dhammaan hawlahaa la xiriira fulinta miisaaniyadda ay Wasaaradda Maaliyaddu ugu wakiilaneysa Sarkaal Loo Igmadey oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda. Tilmaantan waxaa ay sidoo kale Sarkaalka Loo Igmadey hawsha u oggolaaneysaa in hawlo gaar ah uu, hadba sida loogu arko muhiim, cid kale oo ka tirsan shaqaalaha Waaxaha Wasaaradda Maaliyadda ugu wakiisho, si qaab hufan loogu fuliyo hawsha iyo si loo hubiyo in si habboon loo kala qaybiyo waajibaadyada dhammaan dhinacyada kala duwan ee hawlahaa miisaaniyad-fulinta (Lifaqa 1aad, Faqradda 2c ee Dokumentiga diyaarsan (*Template*), ka eeg waxa loo qaddariyo in ay yihiin “hawlo gaar ah” ee ay ka hadlayso Tilmaantan).

1.3 Tilmaantan waxaa sidoo kale si toos loogu maamulayaa cid u wakiilashada awoodaha ee la siiyey Wasiiradaha iyo Madaxda hay'adaha miisaaniyadeed, ee aan ahayn Wasaaradda Maaliyadda, iyada oo la raacayo Qaybta 20aad, Faqradda 4aad. Dhammaan awoodaha ay cid u wakiilanayaan hay'adahan, aan ahayn Wasaaradda Maaliyadda, waa in ay waafaqsanaadaan axkaamta Qaybta 20aad, Faqradda 2aad, ee lagu faahfaahihey Tilmaantan.

2. Wakiilasho

2.1 Awood u wakiilashada uu sameeynayo Wasiirka waxaa fulinteeda loo maraya soo saaridda *Waraaq Awoodo Cid Loogu Wakiilanayo* (Waraaqda).

2.2 Waraaqda waxaa loo diraya oo ay ku socotaa qofka loo wakiilanayo awoodahaas waxaana ay si saraaxad leh oo cad u tilmaameysaa awoodda loo wareejiyey ee la xiriirta miisaaniyad-fulinta.

2.3 Waraaqda waxaa hadba sida uu doono wax uga beddeli kara Wasiirka, laakiin dhammaan waraaqaha ka dambeeya waraaqda koowaad waa in ay si cad u sheegaan in waraaqdii hore la nasakhey oo laguna beddeley mappaan cusub. Dhammaan Waraaqaha Awoodo Cid Loogu Wakiilanayo waxaa ay leeyihiin lambar taxane ah oo mid kasta u gaar ah si loogu tixraaco Waraaqahaa xiga ee wax ka beddel ku sameynaya.

2.4 Lifaqa 1aad ka eeg Waraaqda Diyaarsan ee *Awoodo Cid Loogu Wakiilanayo* oo uu adeegsanayo Wasiirka. Ogow, Waraaqdan Wasiirka kama rideyso mas'uuliyadda guud ee saaran mana ka reebeyso in uu adeegsado awood kasta oo uu Xeerku u oggol yahay.

3. Dib-ugu-wakiilasho

3.1 Marka la beddelo Wasiirka Maaliyadda, Wasiirka cusub waa in uu nasakhaa *Waraaqdii Awoodaha Cid Loogu Wakiilanayey* ee uu soo saarey Wasiirkii Hore oo uuna dib u soo saaraa Waraaqdaa isaga oo adeegsanaya awooddiiisa sida ay dhigeyso Qaybta 20aad, Faqradda 2aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka, 2018.

4. Dhaqangalka

4.1 Tilmaantan waxaa loo tixgelinaya in ay dhaqangashey taariikhda la soo saarey ee ah DD/MM/YYYY

Lifaaqa 1aad – Dokumentiga Diyaarsan ee Waraaqda Awood Cid Loogu Wakiilanayo ee uu soo saarayo Wasiirkha

*WARAAQDA RASMINA AH EE WASIIRKA MAALIYADDA ee DOWLAD-GOBOLEEDKKA
Galmudug*

Lambarka tixraaca ee waraaqda.

Taariikhda:

Magaca
Xoghayaha Joogtada ah/Agaasimaha Guud
Wasaaradda Maaliyadda

Ujeeddo: Waraaq Awood Wakiilasho

Mudane/Marwo [Magaca qofka],

Aniga oo ka ambaqaadaya awoodaha la igu siiyey Qaybta 20aad, faqradda 2aad ee Xeerka Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2018, anniga oo ah Wasiirkha Maaliyadda, waxaan halkaan kuugu wakiishey awoodahan, sida gaarka ah ula xiriira fulinta Xeerka Qoondeynta ee sanadlaha ah (wixii halkaan ka dambeeya loogu yeeri doono “miisaaniyadda”).

AWOODAHA LAGUU WAKIISHEY

1. Waxaa halkaan lagugu siiyey awood aad waajibaaydan ugu sii wakiilan karto cid kale oo ka tirsan waaxaha Wasaaradda, hadba sida aad u go'aansato, si loo hubiyo in si dad ku filan loo kala qaybiyo waajibaadyada si looga soo baxo jaangooyooinka caalamiga ah ee maareynta maaliyadda iyo si qaab hufan loogu fuliyo miisaaniyadda. Wixa sidoo kale waajib ah in aad ogaato in waajibaadyadan oo aad cid kale u wakiilato aaney kaa qaadeyn mas'uuliyadaha ku saaran ee aan kugu siiyey waraaqdan.
2. Waxaa haddaba laguu wakiishey:
 - a. Doorka ah in aad tahay **Sarkaalka Oggolaanshaha ee Wasaaradda** ee gelaya dhammaan balanqaaadyada ay Wasaaradda Maaliyaddu sameynye so.
 - b. Doorka ah in aad tahay mid ka mid ah labada qof ee saxiixayaasha ka ah dhammaan xisaabaha banki ee dowladda, haddii ay tahay Xisaabta Keliya ee Khasnadda/Treasury Single Account (TSA) ama haddii ay yihiin xisaabaha kale ee ka hoos baxa TSA.
 - c. Mas'uuliyadda lagu hubinayo in Wasaaradda Maaliyaddu ay mar walba si joogto ah oo dad ku filan u kala saarto waajibaadyada la xiriira geeddi-socodka miisaaniyad-fulinta, gaar ahaan in la joogteeyo jadwal ay ku qoran yihiin saxiixayaasha, oo ay weheliyaan naamuunadda saxiixooda, oo loo cusbooneysiyo hadba sidiil loogu baahdo iyo goorta loo baahdo, kaas oo tilmaamaya saxiixayaasha aasaasiga ah kuwa beddelka u ah jagooyinkan gaarka ah ee soo socda marka ay timaaddo dokumentiyada la xiriira miisaaniyad-fulinta:

Ministry of Finance -- Expenditure Approval and Signature Matrix										
Responsible Officer	Document									
	Commitment and Payment Order (CPO)		Payment Order Salaries and Allowances (POSA)		Purchase Order		Cheque			
	Commitment Authorization	Payment Approval	Payment Approval	Payment	Approval	Receiving	Sig #1 Main	Sig #1 Alt	Sig #2 Main	Sig #2 Alt
Requesting Officer, Admin Officer, Ministry Contact	Name(s)		Name(s)		Name(s)					
Authorizing Officer	PS/DG &		Name(s)		Name(s)					
Approving Officer			Name(s)		Name(s)					
Receiving Officer						Name(s)				
Certifying Officer		Name(s)		Name(s)						
Paying Officer			Name(s)							
Cheque Signatory							PS/DG	Name	Treasurer	Name

Ministry of Finance – Expenditure Approval and Signature Matrix	Wasaaradda Maaliyadda – Jadwalka Ansaxinta Kharashaadka iyo Saxiixyada
Responsible Officer	Sarkaalka Mas'uulka ka ah
Document	Dokumenti
Commitment and Payment Order (CPO)	Amarka Ballanqaadka & Lacag-bixinta
PAYOUT ORDER SALARIES AND ALLOWANCES (POSA)	AMARKA LACAG-BIXINTA IYO MUSHAARAADKA IYO GUNNOOYINKA
Payment Approval	Ansaxinta Lacag-bixinta
Approval	Ansaxin
Purchase Order	Amar Wax-soo-iibsasho
Approval	Ansaxin
Receiving	Heleya
Cheque	Jeegga
Sig #1 – Main/Alt	Sax #1 – Aasaasi / Beddel
Requesting Officer, Admin Officer, Ministry Contact	Sarkaalka Codsanaya, Sarkaalka Maamulka, Wakiilka Wasaaradda
Authorizing Officer	Sarkaalka Oggolaanaya
Approving Officer	Sarkaalka Ansaxinaya
Receiving Officer	Salkaaga Helya
Paying Officer	Sarkaalka Bixinaya
Cheque Signatory	Saxiixaha Jeegga
Name	Magaca
Names	Magacyada
Treasurer	Khasnajiga

NASAKHID

Anniga oo ah, Wasiirka Maaliyadda, waxaan halkaan ku nasakhayaa waraaqdii Awood Wakiilashada, ee lambarkeeda tixraacu ahaa XXXXX, ee taariikhdeedu ahayd DD/MM/YYYY, laga bilaabo taariikhda waraaqdan ay dhaqangeleyso.

TAARIKHDA AY WARAAQDAN DHAQANGELEYSO

Waraaqdan awood wakiilashada waxaa ay dhaqangeleysaa laga bilaabo DD/MM/YYYY

Mahadsanidiin,

Magaca
Wasiirka Maaliyadda

Waxaan qirayaa oo aan aqbalayaa awoodda la ii wakiishey waxaana fahamsanahay mas'uuliyadaha
la xiriira awood wakiilshadan

Sixiix

Magaca
Agaasimaha Guud/Xoghayaha Joogtada ah

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda & Hor. Dhaqaalaha

Siciid Siyaad Shirwac

